# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Hadal Qoraalka

**Opened: - 10:22 AM** **Hansard No.22/4** **Kal-fadhiga 22aad**

**Fadhigii 12aad** ***07/09/2013***

**Warbixinta Wasiirka Wasaarada Arrimaha Gudaha iyo Su'aalihii Mudanayaashu weydiiyeen.**

**Md. Cali Maxamed Warancade:-** Waam salaamayaa shirgodoonka iyo xildhibaanada sharafta leh dhamaantiinba, bacda salaam, waxa uu Madaxwaynuhu ii magacaabay Wasaarada Arimaha Gudaha oo runtii ah Wasaarad aad iyo aad u balaadhan qiimo wayna dalkan ugu fadhida, hadii laga eego dhinaca horumarka, dhinaca nabadgalyada iyo dhinaca bulshada shaqadeedu waxa weeye shaqo aad u balaadhan, waxa hoos yimaada laamo farabadan oo ay ka mid yihiin ciidamada booliska , ciidamada ilaalada xeebaha, miina baadha oo ay ka mid yihiin badhasaabada Gobolada Iyo Degmooyinka oo ay ka mid yihiin Maayirada oo ay ka mid yihiin salaadiinta iyo cuqaasha oo ay ka mid yihiin dadkale oo farabadan oo aan imika halkan laga sheegayn oo dadaka hoose ah.

Runtii sidaan hore idiinku sheegay Wasaaradani waa Wasaarad aad u balaadhan runtii waxaan jecelahay halkay maanta taagantahay ee ragii iga horeeyay soo gaadhsiiyeen aan ka sii qaado oo aan jecelahay in ay noqodo Wasiir gudan karta xilkaa balaadhan ee la ii igmaday hadii ay tahay xaga nabadgalyada waxanu wadnaa mushruucyo farabadan si ay dadku u dareemi la haayeen in bulshada Somaliland xukuumadooda iyo dowladooduba ay ku hawlan dareemaan amni balaadhan anagoo tababar iyo dib-uhabayn ku samayndoona ciidamada dhamaantoodba.

Anagoo ku dadaali doona inaanu bulshada siino ama aanu kor u sii qaadno cadaalada iyo sinaanta waxaanu ku dadaali doonaa in aanu ilaalino xuquuqul iisaanka shacabka Somaliland , maadaama aan xukuno ciidamada ilaaliya dalka oo dhan oo ay noqdaan aanu walaalayno ciidamada iyo bulshadooda reer Somaliland oo ay bulshadu dareento in xaquqdooda aasaasiga ah oo aan xaquuqdooda aan lagu xadgudbin waxaanu ku dadaali doonaa in aanu horumar balaadhan ka samayno gobolada iyo degmooyinka anagoo adeegsanayna maamulada hoosyimaada

badhasaabada iyo maayirada hawlaha waa lagala leeyahay oo waxna waa boolis waxna waa siyaasad samayn iyo dabagal markaa anagu waxanu yeelandoonaa in doorkaa siyaasada lagu horumarinayo aanu samayno dabagalkeega aanu yeelano hay'addaha hoos yimaada gobolada iyo degmooyinkuna ay fulinta yeeshaan.

waxaanu ku dadaali doonaa in aanu qacan qabano haayadaha si ay u gudaa n waajibaadgooda anagoo wixii aanu dowlada dhexe ahaan ka tarikarno u samayntoona anagoo u salaaxi doona haayadaha shacabka in wixii cashuura ee ay bixiyaan maahe wixii kale si ay contribution u samaystaan si dan aanu anagu imika wadno ee ah dibu habaynta bilicda magaalooyinka waxa jira warar sheegaya in dadka maasaakiinta ah ee damarta yar ee kadaarada wadooyinka fadhiya in la xaaqayo oo ay quruxdu keeni doonto taas waxaan leeyahay waxba kama jiraan quruxda iyo miskiingu waa ay wada socon doonaan nina meeshiisa laga qaadi mayo laakiin waxaanu doonaynaa meesha aw fadhiyo in ay noqoto meel nadiifa oo wanaagsan.

waxan kale oo jecelahay in aan halkan ka sheego wax kasta oo Wasaaradan hoos yimaada oo dhinaca amniga ah mashruuc balaadhan baanu doonaynaa in aanu ugu helno ciidankeena bada oo ah ciidan aad ugu mihiima badaheena sidii ay u hanan lahaayeen in ay noqdaan kuwa ilaaliya khayraadka ku jira oo qalabkii ayku ilaalin lahaayeen aanu imika iibino si ay u ilaaliyaan nabadgalyada badaheena iyo dhaqaalaha ku duugan labadaba, wixii kala ee su'aala eed iga waydiinaysaan diyaar baan u ahay, waadmahadsantihiin.

**<u>Su'aalaha Mudanayaasha:-</u>**

**Md. Ibraahin Axmad Haybe:-** bismilaahi raxmaani raxiim waan salaamayaa shirgudooka wasiika arimaha gudaha saxaafada dhamaan waan salaamayaa

1. Mudane wasiir waxaan maanta joornaalada ga maqlaynaa shirkadii shidaalka ee general energy way guurtay oo alaabteedii maanta barbaray taalaa maxaa sababay in ay guuraan?

2. Dowladaha Hoose dhaqaale aad u badan ayaa soo gala waxa intaa ugu biira dhaqaale ay siiso dowlada dhexe waxa iyana jira kaalmooyin WFP ay siiso, dee markaa dhaqaale aad u farabadan ayaa soo gala siday u baxaana waxaan ka war qabno maaha ilaa imikadan aynu joognay

Gobolada iyo Degmooyinka qaarkood iyagoo dakhlikoodu aad u badan yahay hadan wax qabadka la qabtaa aad buu u yaryahay oo aad is odhanayso intaa boqol keed ayaa la qaban kari lahaa maxad idiinka yaala sidii ad u dardar galin lahaydeen arintaasi?

Xoghayayaasha Dowladaha Hoose oo mid waliba toban sano iyo in ka badan joogay oo ay dadku leeyihiin maxaa shaqaalaha la isku ku badeli waayay, Maxaad wax uga qabanweydeen?

**3**. waxaad tidhi waxaan walaalaynaynaa Ciidamada iyo dadwaynaha waxa jira ciidamo la idhaahdo RRU waxa na jira qodobo dastuuriya oo ka soo horjeeda, waxa jira xaquuq dadwaynaha ama qofku leeyahay waxa jira qodobadaa in aad loogu tundo oo guryaha xoog lagu galo oo la dhaco hantina laga qaado siday dadku ku cabanayaan oo ay sheegayaan, iyadooy waajib tahay in ay ciidamadu gutaan waajibaad kooda dhanka nabadgalyada, hadana qofkan muwaadinka ah xaquuqdiisii iyo nabadgalyadiisii sidee loo dhowrayaa? waxaan kaloo afkaaka ka maqlayay ciidanka bada anagu sadex ciidan unban distoorka ku haynaa ciidanka booliska ciidanka asluubta iyo ciidanka milaterika markaa ciidankan aad sheegayso ee ciidanka badu halkay raacsanyihiin anagu waxaan ku gudbinay in aanay ciidan ahayn ee ay yihiin haayad llaalisa xeebaha ay, laakiin markay waajibaad kooda gudanayaan in la siiyo awoodaha booliska markaa ma ciidan baynu nidhaahnaa mise ha'yad, markaa mudane wasiir waxan doonayaa in aad nooga jawaabto, waanad mahadsantahay?

**Jawabta Wasiirka:-**

1. xildhibaan waad mahadsantahay, marka hore anaa khalday ciidan maaha ee waa ha'yad ilaalisa xeebaha wasaaradayna hoos yimaadaan, markaa taas waa sidaad u sheegtay.
2. ta labaad, arrinta shidaalka iyo shirkada arintaasi arin halkeena ka timid maaha nabadgalyo xumo halkeena ka ditidna maaha shan cisho ka hor waxaan tagay burco qolooyin tuulooyina oo leh xaqii aanu ku lahayn ma hayno sida shaqaale hoosaad ka oo kale taasaa yar dhacday si wanaagsan baanu ugu soo dhamaynay dadka dalkana wax nabadgalyo la'aana oo ka jiraa ma jiraan nabadgalyodarada waxaan u naqaanaa waxaa xamar ka dhacaya international community ku xamar aad bay ugu qul-qulayaan iyada ooy nabadgalyo xumadu noocaa tahay inaga dalkeenu waa nabad waa alxamdulilaa baan ku jirnaa wax dhibaato ah oo

dhacayna ma jiraan markaa sababta waxan ka sugaynaa shirkada barito ayaana balansanahay.

3. takale ee RRUda, waxaanu ugu talagalnay waxyaalaha waxna waa sir oo waxaanu ugu talagalnay in aanu cadawgeena kaga guulaysano, ciidankaa aan soo sheegnay waa ciidanka si gaara u habaysan waxa jira argagixiso ciidankana waxa loo ku talagalay argigixisada anuu intaan joogay meesha ciidankaa waxan ka dhex saaray suuqa iyo shacabka waan xareeyay waxay tahay in waxa uu maanta caalamku ka cabanayo ay ka difaacaan shacabka iyo qarankaba waa ciidan u habaysan inay waxyeelada bulshada ka difaacaan howlkalgii ugu danbeeyey waxa lala soo hadlay booliiska oo layadhi qoladaasaa wax qarxinaysa dabadeedo booliiysku waxa uu yimi gurigii waana garaacay albaabkii aqalka dabadeedo intuu ninkii dadkii wax qarxinayay albaabka danbe ka saaray ayaa intuu albaabkii furay xabad ku faray askartii saddex baa halkii ku dhintay wixii kalena meelahaasay galeen intii wixii ka danbeeyey RRU waxa loogu talagalay inay ka gacan horeeyaan ninka doonaya in uu danbi galo sidaa awgeed wuxuu ku qalabaysanyahay qalab badan oo uu ka xoog roonaan karo danbiilaha oo u sahli kara intaanu danbiiluhu tabaabushaysan in lagaga horeeyo.

**Md. Faarax Maxamed Cabdule:-**

1. Darejadii Ciidama ee la bixiyay waxaa soo baxay cabashooyin siiba Ciidanka Booliiska, Mudane markaa Maxaad ka qabanaysaa Cabashadaa oo anaga aad iyo aad noo soo gaadhay?
2. Waxaa aad baa hi loogu qabaa in la kordhiyo ciidanka booliiska, degmooyin badana aanay lahayn booliis oo aanu joogin, Markaa maxaa idiinka qorsheysan Arrinkaa?

**Md. Maxamed Cismaan Bulqaas:-**

1. Waan salaamayaa dhamaan shirgudoonka mudanayaasha iyo wasiirkaba mudane Wasiir Gobolka Sanaag badhka mida maamul magac u yaala baa ka jira maamuladii hore ee dalka soo maray waa ka dhega adaygeen khaasatan degaanka la iga soo doortay aniga maadaama aanu maamul ka jirin waxa dhici karta in uu bahala Kaleen noqto cidkastina iska imankarto, markaa hodhow yaanay xukuumadu odhanin maxaa waxaa loo sameeyey waa wax ay xukuumadu masuul ka tahay taasi waa taase Maxaa idiinka yaal?

2. Tan kale, ciidamadan RRUda guri islaameed ayay iskaka dhacayaan markaasay qof soo xidhanayaan markay bil haystaan ayay odhanayaan waxbaa lagu waayay taasi mudane Wasiir maanay xaquuqdii muwaadinka meel ka dhacayn?

**Jawaabta Wasiirka:-**

1. Waa mahadsanyahay xildhibaan, horta dalkan anigu waxaan u ahay xog-ogaal waxaan garanayaa markaan gurikayga ka soo baxo ee aan doonaayo in aan imaado Madaxtooyada dadka badankiisu waxa ay igaga hadhi jiray meel dhexe anoo galiya ayaa iman jiray Madaxtooyada waxan garanayaa hargeysa oo kala-qaybsan oo dhinacna iskaraabka iyo waraaquhu yaacayaan dowladina jirto oo dowlada la sheegaynayo, waxan karanayaa qoyska aan anigu ka dhashay oo ka horyimid qaranka Somaliland waan dhexgalay waanan ku guulaystay wixii inagu dhex jiray waa durkay oo imika dhahar buu marayaa, markaa waxaan jecelahay in sidii aan ugu guulaystay midi hargaysa adiguna in aad u hawlgasho waliba anigu cid iraacda maan haysan waagaa, laakiin anaa imika ku dabasoconaayee adna iga horee, waanay inaga dhamaantoondaa dhawaan insha alaah, waanigaa ku sheegay hargaysay ka bilaabantahay inyarbaa imika inagu hadhsan intaana imika waanu ka guulaysanaynaa hadaynu gacmaha is qabsano Isha alaah.
2. intan ay bilaabantay argagixisadu nimankii ku faani jiray dimuquraadiyadu sida maraykan iyo ingiriis waxay sameeyeen guwaantanaama beey iyo waxyaale kale oo aad ka aragtaan joornaalada xaquuqdii la dhowri jiray waxay noqotay wax aan la qiyaasi Karin anigu markii aan sharciga dib u eegay hadaa dihiin golaha wakiilada waxad fasaxdeen ugu yaraan in la hayn karo sagaashan maalmood markaa waxaan jeclaa in aad intaasi ka yaraysaan oo aad ka dhigtaan 40 cisho markaa waxaan ku diyaar karoobaynaa in aanu habeen iyo maalinba shaqayno oo aanu si haduu qofku danbi lahayna in aanu sida ugu dhakhsaha badan usii dayno haduu leeyahayna aanu si dhaqso ah u gudbino maxakamadaha

**Md. Siciid Cartan Cisman:-**

1. WAAN salaamayaa shirgudoonka iyo wasiirkaba mudane wasiir su'aashaydu wasiir waxay tahay anagooy waajibaadkayaga shaqo tahay in aanu shuruucda halkan ka baxda dabagal ku samayno oo aanu ku

ilaalino xukuumada waxa jira sharci halkan ka baxay oo layidhaahdo ismaamulka gobolada iyo degmooyinka sharcigaasi oo ah ka ay ku shaqeeyaan gobolada iyo degmooyinku waajibaad gooda shaqana uu ku cadyahay waxa weeyi hadaba sacaadadul wasiir waxa jirta wareegto ka soo baxday xafiiskaaga wareegtadaasi oo ka hor imanaysa sharciga ismaamulka gobolada iyo degmooyinka waxaanay odhanaysaa horta shaqooyinka fadhiyadooda haduu yahay fadhi aan caadi ahayn iyo hadii kaleba shaqo maalmoodgooka xeerkan bay ku cadahay wareegtada aad soo saartay waxay tahay shirarka aan caadiga ahayn in aanay qabsankarin goloyaasha deegaanku su aashaydu waxay tahay wareegtadaasi majirtaa mudane wasiir hadiise ay jirto maxaa ku gu kalifay in wareegto sharci daro ah soo saarto adiga oo sharcigii wax ka sheegaya

**Jawaabta Wasiirka:-**

1. markaad tidhaahdo wareegto sharci daro ah ma jirto wareegtadaasi markaad se tidhaahdo aniga qoraalkaygu waa jiraa si uu u jirana waan ku sheegayaa sharciga ayaa isheegaya in aan anuu daba gal u leeyahay waxyaalaha ay qabanayaan sidaad la socadaan waxa loo sameeyay dowladaha hoose in ay hore mariyaan dowlad hoosiba deegaanka ay ka dhisantahay waxaanad ogtihiin in maalin walba ay is haystaan haday tahay maamulkooda sare iyo haday tahay xildhibaanada arintaasi waxay keentay in ay waxba kama jiraan ka dhigto horomarkii iyo himiladii ay bulshadu ku soo dooratay xildhibaanada golaha deegaanka markaa arintaasi waxay u baahantahay sharci in aanad akhriyin ayaan u malaynayaa hadaad akhrido waxaan cuskaday sharci oo aan xaq u leeyahay in aan ku ilaaliyo dowladaha hoose sharcigu waxa aw dhigayaa dowladaha hoose marka la soo doorto in ay sameeyaan xeer hoosaad xeer hoosaadku waxa weeyi waxa ay gu kala baxayaan sida ay hawsha u wadayaan waxa kala hagaya weeyi. Waxan ku cadaynayaaa anaa ansixiya xeerka markaa xeerkaasi aniga gacantayda ma soo gaadhin iyada oo aanu imanin xeerkii ay ku gala bixi lahaayeeni aanu imanin ayay iska bilowdeen dabadeedu waxan uyeedhay garyaqaanka guud waxan u yeedhay dowladaha hoose waxaanan ku idhi is qabqabsiga aad isqabqabsanaysaan idinkoo aan xeer hoosaad lahayn waxay ka hor imanaysaa dhaqankii suubanaa ee shaqada waxay keenaysaa in ay daan bulshada waxba ku soo kordhin oo aydaan aan waliba damcay in aan xeer hoosaad u sameeyo golkay qolo waliba soo qorto xeer hoosaad keega oo aan sameeyo xeer hoosaad midaysan oo dhamaan lagu dhaqo

dowladaha hoose ee dalka maadaama ay hoos yimaadaan wasaarada arimaha gudaha garyaqaanka guud ayaa isugu yeedhay horta in ay iyagu soo curiyaan xeer hoosaadkii ka bacdi marka la isugu keeno in dagmo waliba ay soo samaysado garyaqaanka guudna awla eego dabadeedna la isku codeeyo ka bacdi ay halkaas ka soo baxdo xeerkii ay kuwada shaqaynlahaayeen

**Md. Maxamed Xaaji Maxamuud Cumar Xaashi:-**

1. Ciidamada Boolisku waxa iska cad in aanay aqoonba ulahayn waxan ay qabanayaan imikana waxa bada samaysay digreetooyin fara badan maxaad ku tala jirtaa maxaa kaaga yaala sided isleedahay aqoontarida haysata booliiska, Banaan baxyadau waa wax uu dhigayo dastuurku dowladihii ina soomaray ilaa tii aynu dagaalka kula jirnay waa ay necbaayeen banaan baxyada dadkuna ma garanayaan sida loo banaan baxo dowladuna ma garanayso sida looga hortago hadaan Wasiir tusaale ku siiyo anagu anagoo leh waan banaan baxaynaa walina aanan banaan bixin ayaa waxaa dhacday in booliis lagu meersho meelahayagii dabadeedo booliiskii intu anagii noogu yimid xafiiskayagii ayuu halkii nagu garaacay nimankan aad leedahay waxa loogu talagalay argigixisada ayaa intay anaga na soo doonteen rasaas dabada noo qabtay waxa ka dhawaa meesha iskuul aad baanu uga baqnay caruurtii isguulku iyo iyagu in ay isgu dhacaan anagii bay noqotay iyadoo rasaasdii nalagu wado intaanu cararno in aanu caruurtii ku nidhaahno ukaadiya habuuqbuuqina aamusa waxaan la hadalnay wasiirkii waxbarashada oo aanu nidhi bal kaalay soo gurmo meeshan waxbaa ka socdee markaa mudane wasiir in aad maanta ka bilowdo in aad sidan wax ka bedeshaan in hadii banaan-baxa ay ogolaato Wasaarada Arimaha Guduhu in si nabadgalyo ah loo banaanbaxo booliskuna ay hareeraha ka socdaan oo aan rasaas lagala hor iman waayo wasiir waxaan kaaga digayaa banana-baxyadii hore oo dhami dilbuu keenay dowladan aad wasiirka ka dahay dilal badan baa dhacay oo banaan baxyada ka dhacay waxan ka rajaynayaa oo aan filayaa inaad ka hordagto si aanu adigana dil kuugu imaanin waayo cida masuulka ah uun baa qabta?>

**Jawaabta Wasiirka:-**

1. Waad mahadsantahay Mudane xildhibaan waa su'aalo runtii aad ii qiiro galisay waxa laga yaabaa booliis aan wali darejo arag in uu sidaa samaynaayo waan dareemaynaa, markaa waxaan furaynaa akademiyada

saraakiisha ee madheera waxaanan ku xarayntoonoo sargaal ilaaa xidiglaha ayaanu ku xarayntoonaa si looka dhaadhiciyo darajada saran karbahoogu qiimaha ay leedahay iyo sharafka ay huwantahay imikaanu bilaabidoonaa mudane aad ban kaga mahadcelinayaa.

2. mid baad iga codsaday in aan dilkii hore dil lagu darn somaalidii hore ayaa odhan jirtay ninkaan dhiigi hooyadii dhiig ku darin ninba maaha waxan leeyahay in aanan dhiigii hore dhiig ku daran waan kaa aqbalay shacabkana mid baan ka codsanayaa waxan leeyahay aduunyadu mudaharaadka waa la dhigaam waxan leeyahay shacabka mudaharaad waala dhigaa oo dadku iyaga oo u socda si asluuble oo boodhadh wada ayaa la sheegtaa waxa ladoonayo iyaga oo u socda laynlayn inagu laakiin waynu ka duwanahay oo dhalinyaradeenu markiiba waxay isku qaadaan meel ganacsi sariflayaasha dahablayaasha oo waxa ku dhexjira tuugdii xabsiyada ka soo baxday waxa jira marka ay mudaharaadku bilowdo in ganacsadadii meesha fadhiday in uu qori uu bari hore meel ku duuray uu soo qaado ow is yidhaahdo ku difaac marka hore waxaynu u baahanahay in aynu shacabkeena barno in loo mudaharaado si salmi ah.

**Cawad Cali Maxamed** — **Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada**

**C/risaaq Siciid Ayaanle** — **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI**

----------------------------------------------- ----------------------------------------